



OHA Waxay Soo Dhawaynaysaa Rayi- celinta ku saabsan Xeerarka

OHP Bridge – Barnaamijka Caafimaadka Aasaasiga ah

OHP Bridge – Barnaamijka Caafimaadka Aasaasiga ah waa barnaamij caymis caafimaad oo cusub kaas oo ku balaarinayo Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) si uu u daboolo dadka qaangaarka ah ee dakhligoodu ka sarreeyo xadka dakhliga ee OHP. Dadka qaangaarka ah ee dakhligoodu u dhexeeyo 138 iyo 200 boqolkiiba heerka saboolnimada federaalka (FPL) waxay marin u heli doonaan caymis caafimaad oo tayo leh iyada oo loo marayo OHP Bridge, oo ay bixiyaan isla Ururada Daryeelka Isku-dubaridan (CCOs) ee u adeega xubnaha OHP.

Macaashyada OHP Bridge waa sida macaashyada OHP. OHP Bridge ma lahaan doonto khidmadaha bilaha ah ama kharashyada xubnaha, sida lacag-bixinta jaango'an ama lacagta la jari karo.

Maamulka Caafimaadka Oregon waxa ay hadda diyaarinaysaa xeerarka maamuleed ee OHP Bridge – Barnaamijka Caafimaadka Aasaasiga ah. Xeerarkani waa sharciyo ay Maamulka Caafimaadka Oregon, CCO-yada, iyo OHP Bridge – bixiyeyaasha Barnaamijka Caafimaadka Aasaasiga ah ay tahay inay raacaan marka ay bixinayaan barnaamijkan cusub.

Waxaanu jeclaan lahayn inaanu ra'yigaaga helno. Waxaynu doonaynaa in sharciyadan ay ka turjumaan baahiyaha imaan karo mustaqbalka ee xubnaha OHP Bridge – Barnaamijka Caafimaadka Aasaasiga ah, iyo bixiyeyaasha iyo CCO-yada bixiya barnaamijka. Waxaan raadineynaa xubnaha bulshada iyo shuraakada xiiseynaya si ay u bixiyaan fikrado iyo jawaabcelin. Waxaa jira siyaabo dhowr ah oo tan loo sameeyo:

- **Ka-qaybqaado Guddigeena La-talinta Xeerarka (RAC)** ee ka dhacaya aalada Zoom-ka markay tahay Febraayo 6-deeda iyo 7-deeda, 2024 laga bilaabo 2-4 galabnimo maalin kasta. OHA waxay soo bandhigi doontaa xeerarka qabyada ah waxayna ka qaybgalayaasha kala hadli doontaa isbeddellada la soo jeediyay si ay u ururiyaan fikrado iyo jawaabcelin. RAC waxa lagu qaban doonaa afka Ingiriisiga, Isbaanishka iyo ASL iyadoo luuqadaha kale lagu heli karo haddii la codsado.

- Samee wakhti aad **kulan kula yeelato OHP Bridge – shaqaalaha Barnaamijka Caafimaadka Aasaasiga ah** inta u dhaxaysa Janaayo 15-keeda iyo Febraayo 9-keeda, 2024. Adiga ama ururkaaga oo keliya ayaanu la kulmi karnaa. Ama waxaanu bulshadaada xilli idinku habboon u qaban karnaa kulan dhegeysi kooxeed.
- **Ku bixi fikradda hannaanka faallooyinka dadweynaha.** Muddada falcelinta dadweynaha ee Buundada OHP – xeerarka Barnaamijka Caafimaadka Aasaasiga ah waxa ay furmi doontaa 1-da Maarso wuxuuna xirmi doona 19-ka Abriil. Waxaa jiri doona dacwad dhageysi dadweyne oo dhacayso 21-da Maarso.

Ma xiisaynaysaa inaad ka qaybgasho RAC, aad ballan kulan nala yeelato mise su'aal lee miyaad qabtaa? limayl noogu soo dir barta: ohpbridge@oha.oregon.gov oo na soo ogaysii.

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu wax ka ogaado oo isticmaalo barnaamijyada iyo adeegyada OHA waxayna OHA bixisaa caawimaad bilaash ah.

Tusaalooyinka qaarkood ee caawimaada bilaashka ah ee OHA ay ku siin karto:

- Luqadda dhegoolaha iyo turjubaanka luqadda lagu hadlo
- Qoraalo ku qoran luuqado kale
- Farta Indhoolaha
- Daabacaad Balaadhan
- Maqal iyo qaabab kale

Waxaan rajeyneynaa oo aan sugaynaa inaan jawaab kaa helno!